

Somali



**HEEGANKA DULMANE  
DENBI**

**Heeganka dulmane denbi  
Caawin iyo talasiin dulmanayaasha dembi**

**Heeganka dulmane denbi HDD (RIKU)**

HDD wuxuu siiyaa dulmanaasha, ehelkooda iyo markhaantiyada caawin iyo talasiin. Adeega wuxuu ku xiran yahay dad xirfad u leh, si mutadawac (iskaa wax u qabso) ahna ku shaqeeya.

Waxaanu qaddarinaa xuquuqdaada go'aan gaarida, waxaanuna ilaalinaa sirta. Dhammaan adeegayagu waa mid lacag la'aan ah (marka laga reebo khadka telefoonka).

Ma'uuliyada waxqabadka ee HDD, waxaa iska kaashada ururka gargaarka guryaha, ururka xuquuqda carruurta ee Mannerheim, ururka finishka ee cudurada maskaxda, uruka laanqayrta cas, ururka dumarka, iyo madaxda kaniisada, ururka Finland ee deegaankuna ay hagayaan.

**Xaalada waxqabad**

HDD wuxuu leeyahay xafiis dhexe, 8 xafiis gobol, iyo 26 goob-adeeg deegaaneed. Tirada shaqaalahayagu waa 20 mushahar qaata, oo xirfadlayaal ah, iyo in ka baddan 300 oo loo doortay, loona tababaray shaqada, kuna shaqeeya hab mutawacnimo ah (iskaa wax u qabso). HDR waxaa dhinaca maalgelinta ugu mihiimsan siiya ururka khammaarka (RAY) iyo dowlada.

**Adeega HDR adiga ayaa loogu talagalay, haddii**

- aad tahay dulmane denbi
- aad ka shakido, in aad tahay dulmane dembi
- Qof ehelkaaga ah uu noqdo dulmane dembi
- aad tahay markhaati dembi
- aad doonaysid in aad ka hadashid (la kulantay / ku qabsaday) dembi

Waxaad naga la soo xiriiri katraa telefoonka ama fariin e-mail ayaa noo soo diri kartaa, ama waqti gaar ah ayaad naga qabsan kartaa. Heeganka dulmane dembi waxaad sidoo kale, ka heli kartaa qof si gaar ah kuu caawiya. Haddii aad doontid, macag la'aan ayaad nagu la soo xiriiri kartaa.

**CAAWIN SHAKHSIYADEED**

Dulmanaha dembi, ehelkiisa iyo markhaatiga dembi, waxay haddii loo baahdo heli karaan caawiye u gaar ah, kaasoo kuu raaci kara waraysiga booliiska iyo maxkamada. Wuxuu kaa caawin karaa haddii aad doonaysid, inaa hesho diidmo ku -dhowaansho, ama magdhow. Caawiyahaaga ayaad kala hadli kartaa waxyaabaha kugu dhacay iyo suuragalka tallaabada xigta.

**CAAWIYE TELEFOON 0203 16116**

Waddanka oo dhan caawiye telefoon oo luqada finisha ah isniinta – talaadada: 13 – 21 iyo arbacada – jimcaha 17 – 21. Telefoonku wuxuu ku siinayaa talasiin iyo hagid.

**TALASIIN SHARCIYAQAAN 0203 16117**

Talasiinta qaanuunka waxaa khadka telefoonka heeggan ku ah sharciyaqaano isniinta – khamiista 15 – 19. Talasiinta waxaad ka hubin kartaa xuquuqda qaanuun ee aad leedahay, sidoo kale in aad heshid hagid la xirirta arrimahaas.

**VICTIM SUPPORT HELP-LINE 0203 16118**

Talasiin iyo haggid luqadaha Finishka iyo ingiriisiga ah isniinta – arbacada 15 – 18. Warbixin dheeri ah adeega luqado kale [www.riku.fi](http://www.riku.fi).

**WWW.RIKUNET.FI**

Rikunet waa adeeg khadka internetka ku shaqeeya, waxaadna si kalsooni leh ugu gudbin kartaa su'aalahaaga si magac la'aan ah.

**ULRIK**

Ulrik waa mashruuc horumarineed, ujeedadiisuna tahay hormarinta adeega HDD ee ku wajahan dulmanayaasha dembi, ee dadka asal ahaan ka soo jeeda jinsiyadaha kale. Ujeedadayadu sidoo kale waa sidii lagu heli lahaa xal, lagu aqoonsado dulmanayaasha ganacsiga dadka.